# Xeerarka Wanaagga

**Dhamaan ardayda iyo shaqaalaha dugsiga sare ee Westerlundska**

- Waxaan ula dhaqmaa qof walba – arday iyo shaqaaleba – si naxariis leh oo ixtiraam ku jiro, hadal iyo ficilba.
- Waxaan ilaaliyaa nadaafadda iyo bilicda iskuulka, waxaanan si fiican u daryeelaa qalabka iyo alaabta dugsiga.Waxaan ilaaliyaa nadaafada qolka waxbarasha iyo kuwa gaarka ah nadaafadooda qashinkan waxaan ku ridaa meesha loogu tala galay Markaan cunto ku cuno makhaayadda ama kafateeriyada, waxaan ka tagaa goobta oo nadiif ah. Sidoo kale, waxaan ku dadaalaa naddafada meelaha guud.
- Waxba kuma cuno qolka waxbarashada iyo kuwa gaarka ah midna. Umana soo qadan karo cabitaan iyo cunto gaar ah maqaayada
- Fasallada dhexdooda, waxaan naftayda iyo kuwa kaleba siiyaa jawi dagan oo wax lagu barto.
- Telefoonkeyga gacanta waa la ururiyaa ka hor casharka.
- Waxaan imaadaa waqtiga la bilaabayo dhamaan casharrada oo aan waqtigooda ku sugnaadaa. Waxaan soo qaataa dhammaan qalabka waxbarasho ee la filayo inaan isticmaalo, waxaanan isha ku hayaa waxbarashada Teams iyo Haldor.
- Waxaan joogaa oo kaliya meelaha casharadaydu ka socdaan, qeybaha barnaamijkayga waxbarasho ama meelaha guud ee iskuulka.
- Marka uu dhamaado casharada loogu tala galay maalinta waan ka tagaa skuulka iyo agagaarkiisa oo dhan
- Gudaha iskuulka, waxaan u socdaa si degan, waxaan ku hadlaa cod hoose, waxaanan muujiyaa ixtiraam. Haddii aan dhageysanayo muusig, waxaan u adeegsadaa sameecadaha dhegaha (earphones/headphones).
- Iskuulka iyo deegaankiisa/agagaarkiisa waa ka mamnuuc in lagu isticmaalo mukhaadaraadka iyo sigaarka (waxay khuseysaa dhammaan noocyada sigaarka, oo ay ku jiraan e-sigaarka iyo vapeska).
- Waxaan wax ku cuni karaa ama ku cabbi karaa oo keliya meelaha loo qoondeeyay sida goobaha nasashada/ waxbarashada, barxadaha iskuulka, makhaayadda, kafateeriyada iyo bannaanka iskuulka.
- Waxaan had iyo jeer ku dadaalaa inaana khiyaaneyn imtixaannada, shaqooyinka la dhiibayo iyo warbixinada kale. Shaqooyinka la ii diro waxaan ku dhiibaa waqtigooda.
- Haddii shaqaalaha iskuulka ay iga codsadaan waqtiga imtixaanka , waa in aan caddeeyo inaanan sameecado (earphones) ku haysan dhegahayga inta lagu jiro casharka ama imtixaanka.

- Waa in aan u lebisnaa si  fudud oo naloo  garan karo. Wajigaygu waa inuu muuqdaa mar kasta.
- Kuma ciyaarayo lacagta iyo qiimaha lacagta.
- Kahor inta aanan dhejin xayeysiis ama aanan wax kale ku xayaysiin gudaha iskuulka, waa in aan helaa oggolaanshaha maamulka iskuulka.
- Hadii aan la kulmayo qof ama shaqsiyaad aan iskuulka ka diiwaan gashanayn waa inaan kula kulmaa iskuulka banaankiisa